## Sheekh Abdulaadir iyo Khawaarijtu\Takfiirku goormay is qabteen?

Waxaan aad ula yaabay dardaaran Sheekh Abdulqaadir Nuur Faarax (AHUN) u jeediyey umadda soomaliyeed wax yar u inta aan la dilin (halgan.net 20.4.13), waxaa aad uga muuqatey sida sheekhu uga damqanayey dhibaatada umadda soomaliyeeed haysata iyo sida uu khayrka ula jeclaa, waxan markaa is weydiiyey ninkan oo kale ma la dilaa iyo maxaa loo bar tilmaansaday, taasoo keentay inaan dib u eego taariikhda ay isla mareen Sheekha iyo qolada dishey. Waxaan kale oo qoraalka ku eegaynaa, sida ay u kala duwanaayeen aqoonta qoladan sheekhu u lahaa iyo shacabka guud ahaan waxa ay ka aaminsan yihiin.

Sheekh Abdulqaadir waxa laga dharagsan yahay taariikh nololeedkiisii gabi ahaan, wuxuu ku barbaaray barashada diinta Islaamka, wuxuu waxku bartay bartamaha iyo koonfurta somaaliyeed, waxbarasha sare wuxuu kaga soo baxay Jaamacah Islamiyah Madiina Kuliyada shareecada. Culimada ay isku waqtiga ahaayeen waxay ku sheegaan inuu ka mid ahaa hadiiba uusan ugu horeyn culimada towxiidka iyo caqiidada saxda ah soomaaliya ku soo dabaalay wadanka, maadaama ay suufiyo gacanta ku haysey. Shiikha waxa aad loogu xasuustaa duruustii uu ka bixin jirey Masjidii ceel hindi.

Shiikh Abdulqaadir (AHUN) wuxuu caan ku ahaa in uusan marnaba la gaban aragtidiisa diineed xataa haddi naftiisa loogu imaanayo, xiligii Maxamed Siyaad ayay ahayd markuu ka hor yimid culimadii la laynayey waqtigaasna loo taxaabay xabsi mudo saddex sano ku dhow. Xabsiga markuu ka soo baxay wuxuu la kulmay iyadoo xarakadii takfiirku ay fidinayaan manhajkoodii guracnaa ee lagu gaalaysiisanayey umada soomaliyeed, wuxuu sheekhu aad uga hortagey manhajkaas cajalado iyo muxaadarooyin wacyi galin ah ayuu qabtay, halkaas oo la oran karo colaada sheekha loo qabo ayaa ka bilaabatay.

Sheekhu wuxuu lahaa mawaaqif uusan ka leexan oo caan uu ku ahaa, wuxuu waligiiba diidanaa umadda in gaalo lagu tilmaamo ama dhiigooda la banaysto. Waxaa la kale oo la ogyahay mawaaqiftiisii ku aadanaa dagaaladii ahliga ahaa ee soomalia ka jirey 20 sano.

Sheekhu waxuu ka soo horjeedey dagaaladii bariga somalia ka dhacay ee jamaacada isaga loo tiiriyo inay isku firkrad yihiin lagaleen maamulkii Cabdullahi Yusuf, wuxuuna ahaa nin ummada u damqada meel kasta oo ay joogaan diin ahaana u aaminsan in dhiigooda la kala badbaadiyo waana arin ay aad isugu qabteen shabaabka oo qaba in qofkii ka fikrad duwan dhiigiisu banaan yahay iyadoo aan loo eegayn halka uu bulshada kaga jiro, sida Sheekh, Oday, Dumar, Caruur, magac dhaqameed, siyaasi, aqoon yahan ama wax garad kale. Tusaale yar waxa kuugu filan sida ay qaraxyada uga sameeyaan meelaha lagu kulmo sida makhaayadaha, masaajidda ama u beegsadaan goobaha lagu hayo adeega bulshada iyo shirarka sida kii shaamow iyo ardaydii waxbarashada ugu socotey turkiga oo ay sheegeen inuu ahaa jihaad alle ay ugu dhawaanayeen!.

Sidoo kale Sheekhu wuxuu kamid ahaa culimo safar ku tagtay xamar si ay u kala badbaadiyaan golahii maxaakiimta iyo Al Shabaab, sheekhu wuxuu isku dayey inuu u nasteexeeyo shabaabka, Arintan ayaa cusboonaysay khilaafkii hore, sheekhuna wuxuu ku dheeraaday waqtigaa kadib inuu tilmaamo manhajka khaarijiga ah ee shabaabka, goobo

aan yarayna wuxuu umadda uga digey fakarkooda guracan, taas oo colaadii loo qabey sii fogeysey.

Sheekhu wuxuu ka mid ahaa dadka sida adag u aaminsan in shabaabku yihiin khawaarij taana lama gaban jirin, mar la waydiiyey wuxuu yiri. **"Khawaarijta waxayba dheer yihiin labo sifo oo ah, Beenta iyo fuleynimada**".

khawaarijtii hore been kama sheegi jirin dhibaatada ay gaystaan sida kuwii Cali diley (RC) inay alle ugu dhawaanayaan ayayba ku faani jireen sida aan dib ka arki doonno, kuwani inta badan waa inkiraan xataa haddii ficilka lagu qabto iyagoo gamcaha dhiigu ka da'ayo. Arinta Fuleynimada, daliil badan uma baahna mar haddii magacooda iyo muuqaalkoodaba ay qariyaan, laakiin shiikhu wuxuu ka tagey inay khawaarijtii hore ahaayeen kuwo aad u cibaadaysta oo salaadooda iyo quraan akhriskooda lala yaabo, Shabaabku cibaado naftooda iyo cidkale midna uma ogola, xiliga cibaadada waa marka ay jariimooyinka ugu waawayn galaan oo salaada umadda ku gumaadaan.

## Shacabku Waxay la yaabeen Sheekha Shabaab ayaa diley!

Waa wax aad loo fahmi karo inay qariib ula ekaato arintani qof muslimnimo ku barbaaray dhaqan soomaalina u lahaa inuu ixtiraamo culimada iyo dadka wax garadka ah, taa waxa wehiliya aqoon badan oo aan loo lahayn firqadan.

Dadka in badan ayaa u haysta in ninkii Mujrimka ahaa ee diley Cali Bin Abii Daalin (RC) ee khawaarijta ka tirsanaa (Abdirahman Bin Muljim LC) uu ahaa nin caasi faasiq ah oo diin iyo Rabi aan aqoon u lahayn xalaal iyo xaaraanna aan kala soocin, xaqiiqadu waxay tahay inuu ahaa, Nin caabid, taqqi, saalix, saahid ah oo quraanka xafidsan dadkana bari jirey, intii uusan qaadan manhajka qaloocan, Weliba ma la socotaa in saxaabigii Waaliga ka ahaa Masar Cumar Ibn Caas (RC) uu Cumar Bin Khadaab amiiru mu'miniin ka codsaday inuu u soo diro nin fiican oo qaari' ah dadka reer Masarna qur'aanka bara, markaa ayaa Cumar Bin Khadaab (RC) yiri:

" أرسلت إليك رجلا هو عبد الرحمن بن ملجم من أهل القرآن آثرتك به على نفسي فإذا أتاك فاجعل له دارا يقرئ الناس فيها القرآن وأكرمه.

"Waxaan kuu soo diray Cadullahi Bin Muljim (LC) oo ah ahlu qur'aan, naftayda ayaan kaaga doorbiday (yacni madiina inuu ila joogo ayaan jeclaa) haddii uu kuu yimaado guri u diyaari uu dago dadkana quraanka ku baro, ninkaasna karaamee". Waana akhiiran ninkii Cali diley. (RC). Ninkan (LC) Wuxuu sidoo kale qabey inuu mujaahid yahay oo fadli aan la qiyaasi karin Alle agtiisa ka helayo, markuu diley Cali (RC) wuxuu akhriyey oo ku celcelinayey ((و من الناس من يشري نفسه ابتغاء مرضات الله و الله رءوف بالعباد))

"Dadka waxa ka mid ah mid naftiisa ku gatey dalbid Ilaahay ridahiisa, Allana waa u naxariis badan yahay adoomahiisa. ajar inuu shaqaystey ayuu ninkani u haystey.

Khawaarijtu waxay aad ugu tahniyadeeyeen ninkii mujrimka ahaa ee Amiiru Muminiin diley Cali (RC), iyagoo gabayo u tiriyey ay ku muujinayaan fadliga uu kasbaday iyo camalka khayriga ay u arkaan ee uu ka helay dilka Cali (RW) Amirul Muminiin, Rasuulka (SCW) ina adeerkii, gabadhiisa qabey ee janada loogu bishaareeyey.....!!

Tixdan gabayga ahna waxa tiriyey nin khaariji ah oo la oran jirey Abdullahi Ibnu Daxaan isagoo amaanaya Mujrimkii dilka gaystey, wuxuuna yiri:

يَا ضَرْبَةً مِنْ تَقِيَ مَا أَرَادَ بِهَا * * إلاَّ لِيَبْلُغَ مِنْ ذِي العَرْشِ رِضْوَانا
إنِّي لأَذْكُرُهُ يَوْماً فَأَحْسَبُهُ * * أَوْفَى البَرِيَّةِ عِنْدَ اللهِ مِيزَانا

Yacni wuxuu leeyahay seefta ku dhacday Cali (RW) waa darbad ka timid nin Taqqi ah taasoo uu ku dalbayo inuu gaaro Rabiga carshiga u saaxiibka ah raali galintiisa, Weliba waxaan u haystaa inuu yahay khalqiga ninka Alle agtiisa ugu miisaanka wayn ayuu yiri!!

Waxaan leeyahay, hala yaabin haddii Sheekha Al shabaab diley iyo haday masaajid iyo salaad ku dhex dileen, hana la yaabin haday ku farxeen oo gabayo iyo qoraalo tahniyada direen, sida qoraalo uu qoro nin isku magacaaba Eng Khalif Muumin (lama hubo in magacaa in la yiraahdo) wuxuu ku muujiyey farxada uu u qabo Sheekha iyo dilkiisa, weliba shaqsigiisa uu aad u aflagaadeeyey.

Sheekh Abulqaadir noloshiisii waa la yaqaaney waxaa markhaati kale ahaa khaatumada uu ku dhintay, culimadii ay isku waqtiga ahaayeen waxay ka yiraahdeen iyo dadka diley oo ah khawaarij, rasuulkuna waa tuu yiri (scw) xadiithkii uu wariyey Abii umaamah waxa ka mid ahaa:
(وخير قتيل من قتلوا كلاب أهل النار ...)..Cidii ay dilaan ayaa dadka ugu khayr badan, khawaarijtu waa eyda naarta.

Ninka culimadu ka baxsan weydey geeri iyo nolol miyuusan ahayn ey naareed?